

Dareeraha Cad ee Caloosha Nadiifiya

Waa Maxay Dareeraha Cad ee Caloosha Nadiifiya?

Dareeraha cad waxa ku jira biyo cad sida biyaha dhalada, broth, ama kuwa cad ee Jell-O's. Dareeraraha cad waxa uu gaabis ka dhigaa shiiditaanka cuntada, jirkana kagama tagaan cunto aan la shiidin. Dareeraha noocan waxaa loo isticmaalaa marka qofku isu diyaarinayo baaritaan caafimaad. Dareeraha cad waa biyo aan lagu darin dufan ama wax caloosha jilciya. Dareeraha Cad ee Caloosha Nadiifiya lagama helo tamar ama nafaqada aad u baahan tahay mana aha in qofku cabitaankooda joogteeyo wax ka badan maalmo kooban.

Marka aad cabeyso dareeraha cad **ma cuni kartid cunto adag**.

Ujeedada

Dareeraha cad waxaa inta badan la cabsiiyaa bukaanka baaritaanka la doonayo in aanay cunto ku harin mindhicirada, sida ka hor inta aan la galin tubada laalaabanta ee soo sawirta mindhirada hoose, caloosha, baaritaanka saxarada iyo sawirka qeybta kore ee mindhicirada.

Waxyaabaha ku jira dareeraha

Dareeraha Cad ee Caloosha Nadiifiya waxa uu caawiyaa in qof jirkiisa uu ku jiro qoyaan ku filan, waxaa ku jira macdanaha muhimka ah sida soodiyam iyo botasiyam, iyaga oo siiya waxoogaa awood ah marka aanay suurtagal aheyn in qofka laga soomiyo cuntada ama aan lagu talin.

Cuntada soo socota ayaa la ogol yahay in lala qaadan karo dareeraha Cad ee Caloosha Nadiifiya **oo aan laheyn midabka casaanka (guduudka) ama Hurdiga ah.**

- Biyo (biyo cad, dhadhan loo yeelaya ama aashito leh)
- Casiirka **aan miraha laheyn**, sida tufaaxa ama cinabka cad
- Casiirka dhadhanka loo yeelay, sida liimada.
- Cabitaanka aashitada leh, sida (kookoolada iyo root beerka)
- Jelaatiin ama Jell-O (**aan aheyn casaan ama hurdi**).
- Shaah ama qaxwe (aan caano ama caddeys lagu darin)
- Cabitaanka dadka ciyara (Gatorade kaliya) (**aan aheyn casaan ama hurdi**).
- Maraq cad, aan lagu darin dufan (bouillon)
- Jalaatada aan **caano laheyn, faakiho lagu jarjarin, miro** aan lagu darin.
- Cabitaanka khamriga **lama ogola**

Waxbarashada
Bukaanka

Ha cabin casiir midabkiisu yahay casaan ama hurdi, Jell-O's, ama cabitaan kale.

Waa in aad ka dheeraataa wixii aan aheyn cuntooyinka kor lagu soo sheegay



CENTRACARE Digestive Center